# Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda Saaran Bukaanka

**Haddaan nahay Corewell Health, Waxaan dooneynaa inaan khibrad qaas ah siino bukaan kasta iyo qoys kasta. Waxaan dooneynaa inaan iskaashi kula samayno si aan u xaqiijino inaad hesho daryeelka shaqsiga ah, ee tayada sare leh.**

**Bukaannadu Waxay Xaq u leeyihiin Daryeel, Ixtiraam Qofeed, Iyo Daryeel Tayo Leh**

- In dhakhaatiirta Corewell Health ay soo dhawaynayaan, qadarinayaan ayna u adeegayaan dhammaan dadka ayadoo aan laga eegayn qoomiyada, midabka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga iyo dareenka, asalka mesha uu kaso jeedo, diinta, naafanimida, da'da, Heerka HIV ga, jinsiga, dookha galmada, isirka, ama meesha uu ka helay qarashka adeegyada ama aasaas kale oo uu mamnuucaayo sharciga feraalka, gobalka ama kan maxaliga ah. Bukaannada ayaa loola dhaqmi doonaa si waafaqsan aqoonsigooda jinsiga.
- Daryeelkooda ayaa lagu bixin karaa qaab xirfad iyo xushmad ku dheehan tahay markasta.
- Adeegyada luqada ishaarada iyo luqada lagu hadlo, oo lacag la ` an ah, haddii bukaanku uusan si fiican u aqoon Ingiiriisiga ama uu maqalka naafo ka yahay.
- Daawada, adeegyada iyo isku xirka marka loo baahdo. Haddii aanaan buuxin karin baahiyaha caafimaadka ee bukaanka, waxaan u diyaarin doonaa in loo wareejiyo xarun kale. Isku xirka ayaa la samayn doonaa keliya kadib marka bukaanka xog buuxda laga siiyo sababta loo wareejinaayo lana siiyo dookhyada daawada haddii uu doorto inaan la wareejin. Xarunta helaysa bukaanku waa inay aqbashaa soo wareejinta.
- Dedaal kasta ayaa la samayn doonaa si loo siiyo daryeelka diinta/ruuxiyada ah sida uu doorto uuna bixinaayo wadaadka, bukaanka, rabbiga, xubin diineedka ama hogaanka kale ee diinta ama adeegyada diinta ee Corewell Health, haddii la heli karo.
- In laguu sheego sida loo gudbiyo cabashooyinka loona xaliyo khilaafaadka, murannada ama isku dhacyada. Ilaha khayraadka waxaa ku jira adeegyada sida Xiriirada Bukaanka, Gudiga anshaxa iyo wakaaladaha kale ee sharciyeeynta sida uu qabo sharcigu.
- Inaad awoodo inaad adeegsato adeegyada difaaca iyo u doodista marka loo baahdo.
- Inaad hesho xubin qoyskaaga ah ama wakiil ikhtiyaarkaa ah loona sheego dhakhtarka isla marka qofka isbitaalka la dhigo.
- Helitaanka loowada siman yahay ee xiriirada iyo tignooloojiyada elektarooniga iyo xogta ee shaqsiyaadka naafada ah.

**Bukaannadu Waxay Xaq u Leeyihiin Inay Helaan Xog ku Saabsan Daaweyntooda iyo Kooxda Daryeelka Caafimaadka**

Bukaanku wuxuu ka filan karaa kooxda Daryeelka Caafimaadka si ay u siiyaan:

- Sharaxaad cad oo ku aadan cudurka laga helay iyo daawaynta.
- Xog ku saabsan daawaynta gaarka ah ama habraacyada, ayna ku jiraan faa'iidooyinka iyo khataraha caafimaadka, iyo dookhyada caafimaad ahaan macquulka ah ee ku aadan daawayntaan.
- Magaca iyo xirfada shaqo ee dhakhtarka masuulka ka ah daryeelka bukaanka iyo magacyada iyo xilalka dhakhaatiirta kale.
- Natiijooyinka daawada, ayna ku jiraan natiijooyinka lama filaanka ah, oo ka yimaada dhakhtarkiisa ama wakiilkiisa.
- Helitaanka diiwaankooda caafimaadka. Waxaa lagu talinayaa in bukaanku uu akhriyo diiwaankiisa asagoo uu la joogo dhakhtarkiisa ama wakiilkiisa. Bukaanka ayaa sidoo kale xaq u leh inuu codsado uuna helo nuqulka diiwaankiisa gaarka ah ee caafimaadka si bilaash ah.
- Shaxda bukaanka ama xogta kale ee caafimaadka gaarka ah ayaa loo diri karaa dhinacyada sadexaad keliya marka uu ogolaado bukaanku (marka laga reebo sida uu amraayo ama fasaxaayo sharciga si loogu adeegsado daawaynta, lacag bixinta ama shaqooyinka Daryeelka Caafimaadka).

**Bukaannada ayaa Xaq u Leh inay Gaaraan Go'aano Ku Aadan Daryeelahooda**

Bukaanka ama wakiilkiisa sharciga ah ayaa filan kara:

- Inay ka qaybgalaan ayna go'aano ka gaaraan daryeelkooda caafimaadka iyo qorsheynta daryeelka.
- In lagu dhiiri geliyo inay door firfircoon ka qaataan daryeelkooda taasoo ah xeelada badqabka bukaanka.
- Inay leeyihiin dookh ay ku aqbalaan ama ku diidaan daryeelka caafimaadka iyo daawaynta ilaa inta uu ogolyahay sharcigu iyo in loo sheego natiijooyinka caafimaad ee ka dhalanaaya go'aanadaan.
- Fursad ay ku buuxiyaan Dardaaranka hore Loo sii qoray ayna ku ogaadaan in la raaci doono ilaa xadka sharcigu fasaxaayo. Haddii laga codsado, isbitaalka iyo kooxda daryeelka ayaa ka caawin kara bukaanka inuu diyaarsado Dardaaranka hore Loo sii qoray.
- Inay xaq u yeeshaan inay helaan fikirka labaad ee dhakhtar kale, marka ay codsadaan qarashkana iska dhiibaan.
- Inay talo ama fikir ka qaataan Gudigga Sharaf dhawrka.
- Inay gaaraan go'aanno ay uga qaybgelinayaan ama uga saarayaan cid kasta oo kamid ah qoyskooda ama dadka kale ee muhiimka ah doorka ay ku leeyihiin daryeelkooda.
- Inay helaan xog ku saabsan daryeelka dhammaadka nolosha.
- Sharaxaada qarashka laga qaadaayo, caawimaada dhaqaalaha iyo dookhyada lacag bixinta. Bukaannadu waxay sidoo kale xaq u leeyihiin inay helaan nuqulka biilkooda, ayadoo aan loo eegayn cida qarashka dhiibaysa.

**Bukaannadu waxay Xaq u leeyihiin inay Qanaaco iyo Badqab ka helaan Sharciga Gobalka Michigan ee Bukaannada Ku jira Caymisyada Caafimaadka ee Gobalku Aqoonsan yahay**

Waxay filan karaan:

- Inay helaan daryeel lagu baxshay goob badqab leh, amaan ah oo ku filan, kana caagan xad gudubka iyo dhibaataynta. Xakamaynta  kiimikada ama gardaduubka(jirka) ayaa keliya la adeegsan karaa marka ay jiraan xaalado degdeg ah si loo difaaco bukaanka iyo/ama dadka kale.

- In ay helaan qiimeyn joogto ah oo ku aadan xanuunkooda iyo inay qayb ka noqdaan qorsheyaasha maareynta xanuunka.

Bukaanku wuxuu filan karaa:
  - Inuu helo xog ku saabsan xanuunka iyo dookhyada xanuun baabi'inta.
  - Shaqaale feejigan oo heegan u ah kahortaga xanuunka.
  - Xirfadleyaal caafimaad oo si dhakhso ah uga jawaaba warbixinnada xanuunka.
- Inuu helo daryeel lagu siinaayo goob ilaainaysa sharafta bukaanka ee lagu baxsho meel shaqsi ah iyo dhar ku haboon xaalada bukaanka.
- In looga waramo nooca tijaabada ee baaritaanada ama daawooyinka lasoo jeediyay wuxuuna xaq u leeyahay inuu diido daawooyinkaas ayadoo aan wax saamayn ah uga imaan daryeelkiisa.
- Xaqiijinta magaciisa iyo taariikhda dhalashada ayadoo la adeegsanaayo kormeerka indho-indhaynta ah (kaarka aqoonsiga ama dukumiintiyada kale) iyo aqbalaada afka ah kahor inta aan wax daawooyin ah ama caawimaad ah la siin bukaanka.
- Inuu helo xog ku saabsan sida loo soo sheego walaacyada, ayna ku jiraan walaacyada ku saabsan badqabka iyo in lagu dhiiri geliyo inuu talaabadaas qaado asagoo aan laga aargoosan.

**Bukaannadu Waxay Xaq u leeyihiin Sirta iyo Qarsoodiga Xogta**

Waxay filan karaan:
- In la ilaaliyo sirtooda gaarka ah, ayna ku jirto sirta xogta caafimaadka ee gaarka ah.
- Waxay xaq u leeyihiin inay diidaan inay la hadlaan ama la kulmaan qof aan xiriir rasmi ah la lahayn isbitaalka. Dadkaan waxaa ku jira martida ama dadka kale ee aan doorka tooska ah ku lahayn bixinta daryeelka.
- Inay helaan taleefan ay u adeegsadaan wada sheekaysiyada qaaska ah.
- In lagu wareysto laguna baaro goob ay ka helayaan iaalinta(qarinta) sirtooda maqalka iyo muuqaalka ah.
- Inuu la joogo qof ay isku jinsi yihiin marka la baaraayo ama qaliinka lagu wado, haddii ay codsadaan.
- In dharka looga bixiyo keliya marka loogu baahdo ujeedooyin caafimaad.
- In laga codsado ogolaansho qoraal ah duubis kasta ama duubista loo adeegsado ujeedo aan ahayn aqoonsiga, helista iyo daawaynta cudurka.

**Waajibaadka Bukaanka**

Bukaanka ayaa masuul ka ah inuu:
- Keeno taariikhda iyo xogta buuxda, saxda ah ee daacadana ah ee caafimaadka ayna ku jiraan:
  - Nooca xanuunkaaga.
  - Xanuunada hore iyo isbitaal dhigista.
  - Dhibaatooyinka gaarka ah, astaamaha xanuunka iyo walaacyada.
  - Taariikhda daawada (tan loo qoray, midda qandho jebinta iyo daawo dhireedka), (ayna ku jirto xogta qiyaasta iyo inta jeer), falcelinta ka dhasha daawooyinka (cuntada iyo dareeraha ) iyo walaacyada.
  - Isbadellada ku dhaca xaaladaada caafimaad, marka ay dhacaan.
- Inaad hadasho oo na waydiiso su'aalo haddii aadan fahmin qorshaha daawada iyo doorka aad ku ledahy qorshaha.
- Inaad go'aanno faahfaahsan ka qaadato daryeelkaaga.
- Inaad raacdo talooyinka, tallada iyo hanaanka daawada ee aad isku raacdeen adiga iyo kooxdaada daryeelka caafimaadka.
- Inaad raacdo xeerarka Corewell Health ee ku aadan daryeelka bukaanka iyo anshaxa si loo taageero daryeelka tayada leh iyo goobta amaanka ah, sida:
  - Ilaalinta xuquuqda bukaannada kale iyo shaqaalaha iyo hantida Corewell Health.
  - Ku dhaqanka xeerkeena ka caagan tubaakada.
  - Barashada magaca dhakhtarka masuulka ka ah daryeelkaaga.
- Inaad bixiso xogta buuxda, saxda ah ee wakhtigeeda timaada oo ku saabsan dhinacyada bixnaaya qarashka daryeelka lagu siiyay iyo buuxinta waajibaadka dhaqaalaha qaab ku haboon wakhtiga. Daryeelka xaalada degdega ah ayaan dib loo dhigi doonin inta aan uruurinayno xogtaan.
- Inaad aqbasho aadna ogolaato masuuliyada natiijooyinka caafimaadka kaso baxa haddii aad diido daawada ama aadan raacin tilmaamaha dhakhtarku ku siiyay.

**Walaacyada iyo Cabashooyinka**

Haddii aad qabto walaac ama cabasho, muhiim ayay noo tahay inaan helno fikirkaaga waxaana kugu boorinaynaa inaad la xiriirto Waaxda Xiriirada Bukaanka. Waxaan kaala shaqeyn doonaa adiga iyo qoyskaaga si looga hadlo loona xaliyo walaacyadaada. Haddii aad doorbideyso, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso marka aad doonto Gobalka Michigan ama Gudiga Isku Dhafka ah.

Xiriirada Bukaanka ee Corewell Health
**844-403-0429**

Si aad ula xiriirto wakaalada ruqsad bixinta ee gobalka:
Licensing and Regulatory Affairs
Bureau of Community and Health Systems
Health Facilities Division
P.O. Box 30664,
Lansing, MI 48909

Laynka Cabashooyinka Tooska ah ee Gobalka Michigan:
**1.800.882.6006**

Si aad ula xiriirto ururka sharciyeeya isbitaalka:
The Joint Commission
**jointcommission.org**
(Adeegso lifaaqa “report a Patient Safety Event (Soo Sheegista Dhacdada dhanka Badqabka Bukaanka)” oo ku jira Qaybta “Action Center (Xarunta Shaqada)” ee bogga hore)
Boostada ugu dir:
Office of Quality Monitoring
One Renaissance Boulevard
Oakbrook Terrace, IL 60181
Fakiska: **630.792.5636**

Si aad ula xiriirto xafiiska Xaquuqda Madaniga:
Michigan Department of Civil Rights
350 Ottawa Avenue NE
Grand Rapids, MI 49503
**1.800.482.3604**

Corewell Health © 10.2023